

Liiska Hubinta Baarista Astaamaha ee Shaqaalaha kuwa Daryeelka Caafimaadka Aan Ahayn

1

Miyaad:

- Uga dhawaatay (wax ka yar 6 fuudh muddo 15 daqiiqo ah) 14 maalmood ee tagay qof laga helay COVID-19, ama
- Waaxda caafimaadku ma kula soo xiriirtay, haddii ay sidaas tahay, wali ma ku jirtaa muddadaadii karantiilka?

Haa

Waa inaadan shaqada aadin. Waxaad shaqada ku laaban kartaa 14 maalmood kadib markii ugu dambaysay ee aad u dhawaatay qof qaba COVID-19, haddii aad caafimaad dareemayso.

Maya

Waad shaqayn kartaa haddii aadan astaamo lahayn.

2

Ilaa markii ugu dambaysay ee aad shaqayso, ma yeelatay wax kamid ah astaamahan?

Qandho

Neefta oo yaraato ama

Luminta dareenka

Cune-xanuun

Qarqaryo

neefsashada oo dhib ah

dhadhanka ama urta oo

cusub

Qufac cusub

Xanuun murqaha ah

Haddii aad leedahay wax kamid ah astaamahan, waa inaad guriga aaddo, aad ka fogaato dadka kale oo aad wacdo dhakhtarkaaga.

3

Haddii lagaa helay COVID-19 waxaad shaqada ku laaban kartaa marka aad kaga jawaabi karto haa dhammaan saddexdan su'aalood:

Miyaa ugu yaraan laga joogaa 10 maalmood markii ugu horraysay ee aad astaamaha yeelato?

Miyaa ugu yaraan laga joogaa 24 saacadood markii aad xummadda lahayd (adigoo isticmaalin daawooyinka xummadda jabiya)?

Calaamadahaaga kale ma soo wanaagsanaadeen?

Haddii COVID-19 lagaa waayey, ka jawaab su'aalaha soo socda:

Ma u baylahday qof qaba COVID-19?

Haa

- Waa inaadan shaqeynin illaa aad ku jawaabi kartid “Haa” si aad **dhammaan sadexda** ka midka ah su'aalahaan:
 - » Miyaa ugu yaraan laga joogaa 10 maalmood markii ugu horraysay ee aad astaamaha yeelato?
 - » Miyaa ugu yaraan laga joogaa 24 saacadood markii aad xummadda lahayd (adigoo isticmaalin daawooyinka xummadda jabiya)?
 - » Calaamadahaaga kale ma soo wanaagsanaadeen?

Maya

- Waad shaqayn kartaa haddii aadan lahayn astaamo.
- Haddii aad astaamo leedahay, ma shaqayn kartid ilaa 24 saacadood ay ka soo wareegeen kadib markii astaamuhu baaba'een.

Oregon
Health
Authority

QAYBTA CAAFIMAADKA
DADWEYNAHA

Helida dokumintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacaada ballaaran, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.

OHA 2699 SOMALI (12/23/2020)